

Khuraafaadka Maqnaanshaha



Khuraafaad: Maqnaanshaha cudur-daarka leh waa caadi

Xaqiiq: Wakhti kasta oo laga maqnaado iskuulka – ha ahaado mid cudur-daar leh ama mid aan cudur-daar lahayn – waa wakhti ka lumay waxbarashada. Maqnaanshaha joogtada ah sababti ay noqotaba waxay saamayn xun ku yeelataa koritaanka bulsho, shucuureed, iyo tacliimeed ee ardayga.



Khuraafaad: Soo xaadiritaanku muhiim uma ahan ilmaha yaryar

Xaqiiq: Soo xaadiritaanku waa u muhiim ardayda da' kasta. Ka maqnaanshaha iskuulka ee fasalada hore waxay keeni kartaa damiiniimada fasalada dambe.



Khuraafaad: Maqnaanshaha labo maalin bishi wax wayn ma ahan

Xaqiiq: Maqnaanshaha kaliya labo maalin bishi micnaheedu waa in ardaygaagu u maqan yahay si joogta ah. Labo maalin bil kasta waxay isku noqonayaan bil dhan marka la gaaro dhammaadka sanad dugsiyeedka.



Khuraafaad: Ardaydu marwalbo way soo gudi karaan shaqadi dhaaftay wayna fiicnaan karaan

Xaqiiq: Soo gudida shaqada dhaaftay ma badali karto wakhtiga waxbarashada ee lala qaato macalimiinta iyo ardayda isku fasalka ah. Wax barashadu way ka badan tahay shaqada guriga. Xitaa marka ardaydu ay dhammeystiraan shaqadi dhaaftay, waxay seegaan waxbarasho fasal oo qiimo badan iyo wakhti bulsho.

Waxaanu wadajir ka nahay arrintan

Si fiican ayaad u taqaanaa ilmahaaga. Codkaagu waa muhiim. Wada shaqaynta iskuulada iyo qoysaska waxay ka caawin kartaa ardayda inay guulaystaan—maalinba mar.

Ma u baahan tahay caawimo? Waydii iskuulkaaga ama la xiriir mid ka mid ah kheyraadka hoose:

Be@School (Hennepin County)

- be.at.school@hennepin.us
- 612-348-6041

School Attendance Matters (Ramsey County)

- RCAOSAMInfo@ramseycounty.us
- 651-266-3238

Attendance Works (National)

- <https://www.attendanceworks.org/>
- info@attendanceworks.org

HealthyChildren.org



Iskaangaree halkan si aad hagahan uga eegto onlaynka!

Hagaha Maqnaanshaha Qoyska

HAGAHA HEERARKA QOYSKA EE MINNESOTA

Ku Saabsan Maqnaanshaha
Waxa Qoysaska Ay Noo Sheegeen
Waxa Aad Samayn Karto
Khuraafaadka Maqnaanshaha



